Golaha Shacabka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya

Hadal-qoraalka kalfadhiga 4aad
Dokumentiga Kalfadhiga 4aad Kulankiisii 19aad

Taariikh: 30/04/2014

Kalfadhiga 4aad
Kulankiisa 19aad
Saacada la furay: 11:10 am
saacada la xidhay: 1:30 pm
Guntinta: 155

Ajendaha

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Aqrinta warbixintii Guddiga Gaadiidka Dekedaha iyo Wadooyinka ee la xiriirta (Heshiiskii Shirkadda Favori)**
4. **Sii wadidda su'aal wadereedkii Wasiirka Arimaha Gudaha iyo Federaalaka**

Shir-Guddoonka: Guddoomiye Baarlamanka JFS Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari).

Waxaa shirka furey Guddoomiyaha Baarlamaanka Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan Jawaari m waxaana lagu furay Aayadha Qur'aanka Kariinka uuna akhriyay Xildhibaan Sheekh Shaacir. Kadib Guddoomiyaha wuxuu oo jeediyey in la ansixiyo ajendaha Xildh ibaanadana way ansaxiyeen.

Xildhibaan Cabdirashiid Xidig oo qaatey (point of order),wuxuu sheegay xildhbaankii ku dhaawacmay qaraxii ka dhacay Degmadda Xamar-weyne

Xildhibaan Maxamuud Cali Dhuux ay safaaradda Turkiga Balan-qaadey in ay ku daaweyndoonto Isbitaalkooda ku yaala Magaalada Muqdisho.

Guddoomiyuhu wuxuu sheegay in uu u xilsaarey Xildhibaan Nuux in Safiirka Imaaraadka Carabta u qaado Xildhibaanka Imaaraadka Carabta si uu u helo daryeel Caafimaad.

Xildhibaan Xagaafe oo qaatey (Point of order).wuxuu sheegay liiska la qeybiyey ay ka maqantahay awood qeybsiga Dalka.

Xildhibaan Cusmaan Aadan Dhuubowoo ah Guddoomiyaha Guddiga Deke-daha iyo Gaadiidka Badda wuxuu akhriyey warbinta Guddiga iyo tal-soo jeedintooda eek u saabsan heshiiskii Favouri akhrintiisa koowaad.

Guddoonku wuxuu sheegay in Dastuurka Rasmiyahay ee si Kumeel gaadha. horey loo ansaxiyey. Qodka kale ee heshiiska Favouri xukuumadda ayaa horey heshiis ula gashay shirkadda ,heshiisyada iyo conturaadka ay Xukuumadda la gasho shirkaddo ama dowladdo ay u madaxbanaan tahay .wuxuu u yeeray Wasaaradda Arimha Gudaha iyo Federaalak si loo weydiiyo su'aalo Wadareed.

<u>Su'aal</u>

Xildhibaan Cabdalla Boos Axmed wuxuu weydiiyey:

1. Sharciga Goboladda iyo Degmooyinka intaa muddadaa dheer ah waxay wasiiradda soo saareyn in cod kaa heleyn, taa maku qanacsantahay mise waa maya?
2. Maamul goboleedyadda aad ku qanacsatahay waa la su'aaley kuwa ay yihiin .
3. waxaa kaloo la weydiiyey in uu faah-faahin kabixiyo Guddoomiyaya- asha Degmooyinka la bedelay?
4. Wasaaradda A/Gudaha Hay'adaha hostage waa imisa?

Xildhibaan Cabdilaahi Shaacir wuxuu su'aaley inta Maalmood ay u harsanatahay Guddoomiyaha uu sii haynayo jagada Guddoomiyenimo? Goboladda la Xureeyey Raashin ma haystaan .90 ka Maalmood ee la sheegay waqtiga uu billaabanaayo waa waqtigee?

Xildhibaan Cali Xuseen .wuxuu weydiiyey

1. waxa ku kalifay Degmooyinkii horey loo xureeyey in uu magacaabo.

2. maxaa kalifay in uu magacaabo Guddoomiyaha Gobolka Banaadir ?

3. maxaa keeney in hal mar Xilka laga qaado guddoomiyaasha Gobol adda?

Xildhibaan Faarax

1. haddii raashinka loo wadey berdaale ,sow kama mas.uul aha W/Arimaha gudaha ?
2. Haddii wasiiradda ay kaa soo horjeysteen ,xildhibaanadda ma ogtahay in ay dib u eegis kugu sameynkaraan?

<u>Jawaabaha Wasiirka</u>

Wuxuu sheegay Goboladda la xureeyey oo dhan in ay la sameeyeen wada tashi ,wuxuu intaa ku daray, in uu yahay qof Mas'ul ah ,una taa gan in uu wax toosiyo.Sharci cadna ay geeyeen meelaha Al-shabaab la ga xureeyey ayna yihiin dad shaqaale ah labaatan kakoobma,kuwii ho re ku tilmaamey kuwo aad fiican.waaxyaha wasaaradana uu siiyey dh ammaan Gaadiid.

Arinta raashinka wuxuu sheegay in la qabtey burcaddii dhacdey raashinkii mwuxuuna u mahadceliyey Wasaaradda .ragii la soo qabtey baaritaan ayaa ku socda . Raashinkana waxaa loo baahanyahay in ay ka mas'uulnoqdaan Xildhibaanadda Baaralamanka.

<u>Su'aal</u>

Xildhibaan Xeyd wuxuu weydiiyey Wasiirka in faah-faahin uu ka bixyo sababta keentay in Guddoomiyayaasha Goboladda iyo degm- ooyinka Halmar lawada Bedelo?

Xildhibaan Cabdilaahi Abshirow wuxuu weydiiyey

1. in faah-faahin dheerad ah laga siiyo Maamul Goboleedka uu cuskaday Sharciga Lam. 19 ee 1963dii ,waxaa jiray sharcigaas sharciyo ka danbeeyey . waxaa ka danbeeyey sharcigii lam. ahaa 116 uu Baarlamanka ansaxiyey?
2. Wuxuu weydiiyey in uu sharciyahay go'aanka Golaha Wasii radda ama isaga sharcigii uu sameeyey in ay sharci tahay?
3. la tashi miyuu la sameeyey Golaha Baarlamanka markii u cuskanaayey Sharciga?
4. waxaa la weydiiyey sababta mudnaanta uu u siiyey Degmoo yinka qaar ,kuwa kalane uusan weli magacaabin?

<u>JawaabtaWasiirka</u>

-Arintaani waxaa mas'uul ugu ah wasaaradda Arimaha Gudaha

-Turkigana wuxuu sheegey in uu xiriir Wanagasan kala dhaxeeya iyaga Soomaaliya.

-Raashinka uu turkiga uu bixinaayo waxaa ma'uul nagaga ah W/Arim aha Gudaha.

-wuxuu sheegey in aysan isku dirin wax shacab ah ,waxaa loo wareejiyey Jowhar,Balcad iyo Mahadaay.

-Sharciga lam.19 wuxuu sheegay in ay tahay hooyadii Aasaaska Gobol- adda oo loo noqdey bishii Augost 1963dii .Qod.44-aad wuxuu sheega-yaa in loo baahanyahay sharcigii lagu dhaqilahaa Goboladda la xuree- yey waxaana u fasaxaaya sharciga 19-aad ee horey u soo baxay taasna Wasiirka waxay u fasaxaysaa in uu magacaabo Guddoomiyaasha Gob-oladda iyo Degmooyinka.

-Arinta Hiiraan wuxuu sheegay in uu u sameeyey Maamul.

Su’aal

Xildhibaan Maxamed Amiin

1. wuxuu weydiiyey Wasiirka in uu ku qanacsanyahay Maamuladda uu dhisey in ay yihiin sharcidaro?
2. wuxuu weydiiyey waxa ku kalifay in uu u dhiso Maamul Gobolka Hiiraan?
3. wuxuu weydiiyey waxa uu ugu cadaalad faliwaayey Gobolka Hiraan?
4. wuxuu weydiiyey Wasiirka in uu ka mas’uul yahay waxa ka dhacay Balcad?
5. wuxuu weydiiyey in uu aqbalaayo in dib-u-eegis ku sameeyo in u xilka iska casilo?

Xildhibaan C/llahi Sheekh Ismaaciil

1. wuxuu weydiiyey talaabada ay Wasaaadda ka qaadeyso in qunsul loo magacaabey Kismaayo?
2. Wuxuu wediiyay inuu diyaar u yahay in uu is iscasilo haddey golaha Wasiiradda Go’aan ku gaaraan.

Xildhibaan Cabdiraxmaan Shiraar

1. Wuxuu weydiiyay maamulka uu dhisay inuu dhameystiro
2. Waxaad sheektaa dadka casilay ama xilka laga qaaday waxa aad ugu talagashay.

Xildhibaan Adan Dhaayoow.

1. Ciidanka Wasaaradda miyaa waday raashiinka ama ciidan kale?
2. maxay mas’uul uga noqon weysay Wasaaradda Arrimaha Dibadda.
3. Mas’uuliyadda ma waxa laga rabaa Wasaaradda mise Xildhibaanada.

Xildhibaan Cabdilaahi Maxamed Ciise,

1. Ma sharcidaraa Golaha Wasiiradda.
2. Maxaa ula tashan weyday Baarlamaanka.

Xildhibaan Cabdifataax Nuur

1. maxay ku dhacday iney gaarsiinweydo raashiinka dadka soo barakacay.
2. Mala socotaa in ay dad gaar ah raashiinka ay ku gataan suuqa Bakaaraha.

Jawaab Wasiirka

Arinta golaha Wasiiradda waan taageersanahay

- Hadii sharciga laga waayo waxaa loo noqonayaa sharcigii hore oo ah L.N,19-aad
- In waxyaabaha aas aas ka u ah Gobolka sida saldhiga, Maxkamadda ayaa lagu bilaabaa,
- Haa Waan u dheelitirnay
- Ciidanka Xooga dalka ee Buur-hakaba ayuu ahaa
- Waxay saran tahay Mas'uuliyadda Wasaaradda Arimaha Dibadda. Haddii Xil. Dhaayow damaanad qaadaayo waan u dhiibeynaa.
- Wuxuu sheegay in uu maamul udhisayo cidii ubaahan in loo dhiso maamul.
- Wuxuu sheegay in aysan jirin raashiin la geeyay Bakaaro uu Ogyahay,wuxuu sheegay in uu hubiyo raashiinka uu gaaray meesha loogu talagalay.
- Sharciga la isticmaalayo waa sharciga lam.19 uu u fasaxaayo in uu magacaabo maamulada Gobolda iyo Degmooyinka.
- cid lagu qasbi karo in ay is casisho ma jiro.

Xildhibaan Cabdillaahi Coonka:wuxuu sheegay in IPU ay u soo direyn warqad tacsiya ah Baarlamanka JFS,ayna la qeybsanayaan Tacsiyadaas xil. Ka geeriyoodey Baarlamanka.

Wasiirka wuxuu u mahadceliyey si wanaagsaneyd ay u weydiiyeen Su'aalha Xildhibaanada. Wuxuu codsaday in Xeer-hoosaadka lagu dhaqmo.

Guddoomiyaha wuxu sheegay in 90 daqiiqo uu xaq u leeyahay Wasiirka inuu su'aalaha kaga jawaabo. Wuxuu kaloo soo jeediyay in Baarlamaanada Caalamka lagu saleeyo axsaabta siyaasadda waxayna Baarlamaaka u tahay tijaabo,wuxuu

sheegay iney su’aalha ay sii noqdeen su’aalihi laweydiinayay Wasiirka Arrimaha Dibadda.

Shaqaalaha in ay yihiin Fasax maadaama ay biri tahay 01/may/2014, oo ah maalinta shaqaalaha laakiin uu guddiga joogtada uu shirkiisa jiro,Xukuumaddana ay sabtida imaaneyso ayna soo jeedindoonto waxqabadka Dowladda.

Shir Guddoonka, Guddoomiye ku-xigenka 1aad ee Golaha Shacabka Mudane Jiilaani Nuur Iikar, oo shir Guddoominayey kalfadhigii 4aad kulankiisii 19aad, ayaa sheegey in uu shirka xiran yahay sacada marka ay aheyd 1:30 pm.